Casharka 13

1. Maxaa Ilaah sameeyey kaddib markii Aadan iyo Xaawo ay adeeci waaeen Isaga?
-

2. Miyaa Ilaah Aadan ugu yeeray iyadoo ay ugu wacan tahay inaanu garanaynin halkii uu joogay?
-Maya.
-Ilaah waxy waliba wuu garanayaa.
-Ilaah wax waliba wuu arkaa.

3. Maxaa Ilaah Aaddan ugu yeeraya?
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan u yimaado Isaga oo uu qirto dembigiisa.
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan u yimaado Isaga oo uu aqbalo-inuu isaga addeeci waayey.
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan u yimaado Iyaga oo uu qirto inuu maqlay codkii Shayddaanka.

4. Sidee baa Ilaah abeesada u ciqaabay?
-Abeesada waxaa lagu xukumay inay xabadka iyo caloosha ku gurguurato.

5. Sidee baa Ilaah u ciqaabay Xaawo?
-Xaawu waxay ahayd inay si dhib iyo xanuun leh ilmo ku dhasho.

6. Sidee baa Ilaah Aadan u ciqaabay?
-Aaadan waxay ahayd inuu dhulka beero iyadoo uu wejigiisu dhididsan yahay, oo dhulkana badar aan badnayn ka helo.
-Ilaah wuxuu kaloo inkaaray dhulka.



7. Waa maxay calaamadaha sheegaya in Ilaah dhulka habaaray?
-Waxaa dhulka daadsan geedo qodxo dhala iyo dhalato la baxda beeraha.
-Waxaa dhulka ka jira abaaro iyo fatahaad.
-Waxaa kaloo dhulka ka baxaya dhir sun ah oo waxaa ku badan masas.
-Halaq iyo Mas baa dadka qaniina.
-Dadkana tacab baa ka haysta inay masruufkooda soo saartaan.
-Dadku way jirradaan.
-Dadku way dhintaan.

8. Wax yar kaddib markii Ilaah ciqaabay Aadan iyo Xaawo, maxaa Ilaah iyaga ugu ballanqaado inuu u sameeyo?
-Wax yar kaddib markii ciqaab la saaray Aadan iyo Xaawo, ayaa Ilaah iyaga u ballan-qaaday Badbaadiye.

9. Maxaa Badbaadiyuhu samayn doonaa?
-Wuxuu Badbaadiyuhu u iman doonaa inuu dadka ka Badbaadiyo awooddda dembiga.
-Wuxuu u iman doonaa inuu dadka ka badbaadiyo awoodda dhimashada.
-Wuxuu u iman doonaa inuu dadka ka badbaadiyo awoodda shayddaanka.

10. Badbaadiyaha waa kuma?
-Kuma ayuu noqon doonaa Badbaadiyhu.
-Badbaadiyuhu wuxuu noqon doonaa Wiil gabar Bigrad ahi dhashay.

11. Maxaa Ilaah u ballanqaaday inuu Badbaadiye soo diro?
-Waayo Ilaah aad ayuu dadka ood han u jecel yahay.

12. Miyaa Aadan iyo Xaawo u qalmeen jacaylka Ilaah?
-Maya.
-Aadan iyo Xaawo waxay u qalmeen dhimasho.

-Maxay Aadan iyo Xaawo sameeyeen kaddib markii ay Ilaah addeeci waaeen?

-Waxay caleemo ka samaysteen dhar.
-Maxay Aadan iyo Xaawo dharka uga samaysteen caleemaha.

-Waayo waxay doonayeen inay Ilaah ka qariyaan dembigooda.

-Miyaa qofi dembiyadiisa ka qarin karaa Ilaah?
-Maya.
-Ma jiro qof dembiyadiisa ka qarin kara Ilaah.

-Balse Ilaah wuxuu diiday caleemihii ay dharka ka samaysteen Aadan iyo Xaawo.

-Maxaa Ilaah u diiday caleemihii ay Aadan iyo Xaawo isku tosheen?

-Miyaanu Ilaah jeclayn caleemaha?
-Maya.
-Ilaah waa Kan abuuray Caleemaha sameeyey.

-Muxuu Ilaah u diidayaa caleemaha Aadan iyo Xaawo ay samaysteen?

-Ilaah wuxuu doonayey inuu Aadan iyo Xaawo baro inaanay jirin wax ay samayn karaan si Ilaah ku aqbalo iyaga.



-Miyaa Ilaah hortii laynagu aqbalayaa iyadoo ay ugu wacan tahay dharka aynu xiran nahay awgii?
-Maya.

-Miyaa Ilaah hortii laynagu aqbalayaa iyadoo ay ugu wacan tahay shuqulka aynu samaynayno?
-Maya.

-Ilaah aqbali maayo kuwa raaca jidadkooda ama dariiqyadooda.
-Ilaah aqbali maayo kuwa doorta dariiqooda.

-Ilaah wuxuu doonayaa inaynu raacno dariiqiisa oo keliya.

-Ilaah wuxuu inaga doonayaa inaynu dooranno dariiqiisa oo keliya.

-Waa kuma kan awoodda u leh in Aadan iyo Xaawo lagu aqbalo Ilaah hortii?
-Ilaah.

-Maxaa Ilaah u sameeyey Aadan iyo Xaawo?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:21

21-Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu Aadan iyo naagtiisii u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay iyagii.

-Ilaah wuxuu dhar uga sameeyey Aadan iyo Xaawo harag xoolaad.

-Halkee buu Ilaah ka keenay haragga xoolaha?

-Ilaah wuxuu u loogay iyaga neef xoolaha ah, oo maqaarkii buu ka

siibay.

-Maxaa Ilaah neefka xoolaha ah u bireeyey isagoo doonaya inuu dhar uga dhigo Aadan iyo xaaow.

-Ilaah Aadan iyo Xaawo ayuu wax barayey.

-Muxuu Ilaah barayey Aadan iyo Xaawo?

-In adeecis-darradu keento dhimasho.
-In dembigu keeno dhimasho.

-In ciqaabta dembiguna tahay dhimahso.

-Dhimahadii ugu horraysay ee dunidan waxay ahayd tii Ilaah neefka ugu qalay Aadan iyo Xaawo.

-Weliba Aadan iyo Xaawo adeecid-darradoodii waxay istaahishay dhimasho, Ilaahna dhar buu u sameeyey.

-Maxaa Ilaah Xaawo iyo Aadan ugu sameyeey dharka?
-Waayo Ilaah aad buu u jeclaa Aadan yo Xaawo.

-Aadan iyo Xaawo iyaga un dharka ma gashayn.

-Wuxuuse ahaa Ilaah kii Aadan iyo Xaawo dharka u geliyey.

-Maxaa Ilaah ugu oggolaan waayey Aadan iyo Xaawo inay qudhoodu xirtaan dharka?

-Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawo barayey in isaga oo keliya uu wax daboolo.



-Ilaah wuxuu barayey Aadan iyo Xaawo inaanu dadka ku aqbalin inay raacaan waddooyinkooda.

-Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawo barayey inaanu aqbalaynin kuwa doorta dariiqyada ay ku soconayaan.

-Ilaah wuxuu Aadan iyo Xaawo barayey inay raacaan dariiqiisa oo keliya.

-Ilaah wuxuu kaloo barayey Aadan iyo Xaawo inay doortaan tubta Ilaah oo keliya.

-Maxaa Ilaah sameeyey kaddib markii uu Aadan iyo Xaawo u xiray dharka?

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:22-23

22-Oo Rabbiga Ilaah ahuna wuuu yidhi, Ninku wuxuu noqday sidi mid innaga inaga mid ah, isagoo garanaya wanaagga iyo xumaanta; oo haatan, waaba intoosoo uu gacantiisa soo fidiyaa, oo uu wax ka qaataa geedka nolosha, oo uu cunaa oo uu weligiis noolaadaa.
23-Sidaas daraaddeed Ilaah isaga wuu ka saaray Beer Ceeden, si uu u beerto dhulkii isaga laga soo qaaday.

-Ilaaha Aabbaha ah, iyo wiilka BAdbaadiyaha ah, iyo Ilaaha Ruuxa Qoduuska ah waxay la hadlayeen Aadan iyo Xaawo.

-Horraan, aadan iyo Xaawo waxay garanayeen wax anaagsan oo keliya.
-Balse imminka, Aadan iyo Xaawo waxay barteen sharkii.

-Horraan, Aadan iyo Xaawo waxay garanayeen inay Ilaah addeecaan.
-Balse imminka, Aadan iyo xaawo waxay garanayaan adeecis-darrada.

-Horraan, Aadan iyo Xaawo ceeb ma ayan garanaynin.
-Laakiin imminka, Aadan iyo Xaawo waxay garanayaan ceebta.

-Horraan, Aadan iyo Xaawo waxay garanayeen nolosha oo keliya.
-Imminka, Aadan iyo Xaawo waxay garanayaan dhimashada.

-Maaddaama Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, Ilaah wuxuu iyaga ka eryey Beer Ceeden.

Bal aynu akhrinno Bilowgii 3:24

24-Kolkaasuu ninkii eryay; Beer Ceeden barigeedana wuxuu taagay Keruubiim, iyo seef ololaysa, oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhowrto jidka geedka nolosha.

-Maxaa Ilaah sameeyey si Aadan iyo Xaawo aanay dib dambe ugu noqon Beer Ceeden?

-Ilaah wuxuu meeshii dhigay malag la yiraahdo Kerubiim iyo seef ololaysa oo la dhigay halka laga soo galo Beer Ceeden.

-Maxaa Ilaah sidaas u sameeyey?

-Ilaah ma uusan doonaynin in Aadan iyo Xaawo ay dib ugu soo noqdaan Beer Ceeden.

-Muxuusan Ilaah u doonaynin in Aadan iyo Xaawo aysan ugu soo



nolonin beer Ceeden?

-Waayo Aadan iyo Xaawo waxay adeeci waayeen Ilaah oo way dembaabeen?

-Miyaa Aadan iyo Xaawo dhinteen?
-Haa.

-Sidee bay Aadan iyo Xaawo u dhinteen?

-Aadan iyo Xaawo waxay ka dhaqaqeen Ilaah.
-Aadan iyo Xaawo waxay ka dhaqaaqeen Ilaahii iyaga siiyey nolosha.

-Aadan iyo Xaawo waxay ahayd inay ku noolaadaan nolol iyaga iyo Ilaah la kala dhaqaajiyey.

-Ilaah waa qoduus.
-Ilaah dembi kuma jiri karo.

-Ilaah ciqaabta uu dembiga u hayo waa dhimasho.
-Aadan iyo Xaawo waa aabbaha iyo hooyada dadka oodhan.

-Waayo Aadan iyo Xaawoba way dhinteen, dadka oo dhanina way dhimanayaan.

-Waayo Aadan iyo Xaawo Ilaah waa laga dhaqaajiyey, dadka oo dhanna Ilaah waa laga dhaqaajiyey.

-Ilaah waa qoduus.
-Ilaah dembi kuma jiri karo.
-Ilaah ciqaabta uu dembiga u hayo waa dhimasho.